

SHIRKA AAYA KA TASHIGA BEELWAYNTA HAWIYE

Warmurtiyeed.

20/04/21

Shirweyne ay ka qaybgaleen odayaasha dhaqanka, xubno ka tirsan midowga murashaxiinta, xildhibaanno ka tirsan labada aqal ee Baarlamaanka, Xildhibaanno ka tirsan baarlamaannada Galmudug iyo Hirshabeelle, aqoonyahanno, Haween iyo dhallinyaro ka soo jeeda beesha Hawiye ayaa looga hadlay xaaladda taagan ee dalka iyo xilliga kala guurka ah

Shirwaynuhu wuxuu isku raacay qoddobada soo socda

- 1-** In ay sharci darro tahay muddo kororsigii xildhibaanno ka tirsan Golaha Shacabka ee Baarlaamka muddo xileedkiisu dhammaaday ay u kordhiyeen madaxweynihii hore ee muddo xileedkiisu dhammaaday, iyaguna iskugu kordhiyeen muddo labo sano ah. Sidaas daraadeed Shirwaynuhu uma aqoonsana Maxamad C/Ilaahi Farmaajo Madaxweyne Soomaaliyeed.
- 2-** In degdeg looga laabto go'aanka muddo ku darsiga sharci daraa ah. Shirwaynuhu wuxuu ku adkaynayaa in uu wada kasta lagu hor istaago muddo kororsiga, si aysan u meelmarin.
- 3-** In badbaadada dalka ay ku jirto qabashada doorasho heshiis lagu yahay, tasoo uu saldhig u yahay heshiiski 17 Sep. Waxaan ku baaqaynaa in ay shir deg deg ah isugu yimaadaan Madaxda Dowlad Goboleedyada iyo Saamilayda kale ee Siyaasadeed ee dalka, iyadoo aan loo xayirmin Madaxweynihii hore, maadaama uu cadaystay in uu san rabin doorasho, taa bedelkeedana uu doorbiday muddo kororsi sharci dara ah.
- 4-** Wuxuu ka digayaa cawaaqib xumida ka dhalata muddo kordhinta sharci darrada ah, wuxuuna caddaynayaa in mas'uuliyadda ay qaadayaan Madaxweynihii muddo xileedkiisu dhammaaday iyo guddoonka aqalka hoose ee Baarlamaanka.
- 5-** Waxaan mar kale ugu baaqaynaa Taliyayaasha ciidanka qalabka sida in ay ciidanka ka saaraan loollanka siyaasadeed, iyadoo si gaar ah loogu digayo Taliyaha Ciidanka dhulka, Taliyaha Nabadsugidda iyo Taliyaha Booliska oo si gaar ah ugu hawlan fulinta ajandaha muddo kordhinta.

- 6-** Wuxuu canbaaraynayaa mowqifka qaar ka mid ah dawlad Goboleedyada ay ku taageereen muddo kororsiga Farmaajo. Shirwaynuhu wuxuu cadaynayaa in aysan shacabka Soomaaliyeed ku matalin go'aankaas, waxaana laga dalbanayaa in ay degdeg uga laabtaan go'aanka oo horseedi xasilooni dari ku timaada guud ahaa Soomaaliya, gaar ahaan deeganada Beeshu degto, haddii kale waxaa loo aqoonsanaysaa in ay mas'uuliyadda burburka qayb ka yihiin.
- 7-** Shirwaynuhu wuxuu u mahadcelinayaa dawlad Goboleedyada Puntalnd iyo Jubbaland, Aqalka Sare ee Baarlamaanka, Midowga Murashaxiinta iyo beesha caalamka oo diiday muddo kororsiga sharci darrada ah ee lagu wiiqayo dimoqoraadiyadda curdunka ah ee dalkeena ka hana qaadaysa.
- 8-** Shirwaynuhu wuxuu ugu baaqayaa ciidanka Nabad ilaalinta AMISOM in ay ka fiirsadaa ilaalinta Madaxweynihii hore ee muddo xileedkiisu dhammaaday, kaaso ku hawlan hurinta fidno iyo abaabul colaadeed.
- 9-** Shirwaynuhu wuxuu ugu baaqayaa shacabka Soomaaliyeed in ay diidaan muddo kordhinta sharci darrada ah, meelna uga soo wada jeestaan difaaca hiddo siyaasadeedka soo jireenka ee xukunka sida nabadda ah la isugu wareejiyo afartii sanaba mar, taasoo udub dhexaad u ah dhismaha nabadda, dawlad dhiska iyo Dimoqoraadiyadda dalka ka hanaqaaday.
- 10-** Shirwaynuhu wuxuu uga mahadcelinayaa beesha Caalamka daddaalka joogtada ah ee ay la garab taagan yihiin shacabka Soomaaliyeed.